

Telefoon lambaro muhiim ah

Haddii ay xaalad deg deg jirto:

Booliska 112 ama 117	112 ama 117
Khadka booliska ee dumarka (mashiinta jawaabta; askariyad ayaa dib u soo wacayso)	031 332 77 77
Dhooli/Gurmadyaal	144


Haddii ay jiraan shaqaaqo qoys ama ku la xiriira jinsiga, adeegyo la talin oo uu dheer tan booliska ayaa la heli karaa:

Caawinta dhibanaha Bern	031 370 30 70
Caawinta dhibanaha Biel	032 322 56 33
Lantana (shaqaaqo jinsiga) Bern	031 313 14 00
Vista (Shaqaaqo jinsi + qoys) Thun	033 225 05 60
Barnaamijyada baridda ee dambilaayaasha: Bern Xarunta Gargaarka ee ka Hortaga Shaqaaqada Qoyska	031 633 50 33

La talin guud iyo talo sharciyeed halkan ayaa laga heli karaa:

ISA – Xarunta Tallada iyo Macluumaadka ee Arrimaha Ajaanibta	031 310 12 72
Xafiiska Talo Sharciyeed ee Bern ee dadka baahan	031 385 18 20
Gargaarka Qaxootiga ee Switzerland	031 370 75 75
Gggfon – Isku-duubnaan looga hortagayo shaqaaqada midab kala sooca	031 333 33 40
Caawimaadka Magan-gelyo doonka Bern	031 382 52 72
CSP Berne-Jura	032 493 32 21


Waxaad macluumaad ka heli kartaa aflaamta
wada-noolaanshaha oo leh luuqadani iyo mid kale,
website-keenna: www.police.be.ch

 Hel app-kayaga:
www.police.be.ch/app

 Nagala soco Twitter:
www.police.be.ch/twitter

Ugu noolaada si wada jir ah Magaalada Bern

Ku soo dhowaada! Dadka Switzerland
way is xushmeeyaan way na xushmeeyaan
sharciga u daggan halkan. Taasi ayaa
waxay aasaas u tahay nabad ku wada
noolaansho.



Sidaas ayaan si nabad ah ugu wada nool nahay Magaalada Bern

Dad asalkooda uu kala duwan yahay ayaa ku nool Switzerland. Sharciyada iyo mucaamalaadka waa in la xushmeeyaa si nabal loogu wada noolaado. Dhammaan dadka ku nool Switzerland waxay leeyihiin xuquuq iyo mas'uuliyado oo uu siiyay sharciga.

Xuquuqda ugu muhiimsan waxaa lagu xusay Dastuurka Federaalka. Tusaale ahaan.

- > Dhammaan dadka way u siman yihiin sharciga. Takoor iyo midab kala sooc waa la mamnuucay.
- > Dumarka iyo ragga waxay leeyihiin xuquuq siman.
- > Dhamman dadka waxay xor yihiin diintooda iyo ku dhaqankeeda.



Booliska maalin walba

Switzerland gudaheeda, booliska ayaa u taagan wada noolaanshaha maalin walba waxay na muhiim u yihiin ammaanka waddankeena. Booliska waxay shaqadooda tahay in ay difaacaan dhammaan dadka Switzerland, in ay fuliyaan sharciyada ay na dacwo ku oogaan falalka dambiyeed. Sababtan awgeed, waxay qaban karaan sheeyo kale Aqoonsi baarid.

Haddii lagu baaro, waa in aad tusisaa aqoonsi ama aad u caddaysaa aqoonsigaaga qab kale.

- > Waa dambi in aad sheegto macluumaad been ah.
- > Booliska waxay xaq u leeyihiin in ay ku geeyaan saldhig boolis haddii xaqiijin dheeraad ah loo baahdo.
- > Booliska waxay baari karaan dharkaaga, boorsooyinkaaga iyo sheeyada kale oo aad wadato si ay u caddeeyaan ama uga hortagaan dambi.

Xataa booliska waa in ay u hoggaansamaan sharciyada una shaqeeyaan si caddaalad ah.

- > Waa in ay ku siiyaan sababta ay u baarayaan aqoonsiga (cadayn la taaban karo).
- > Saraakiisha booliska oo aan xirnayn dhar waa in ay ku tusaan cadayntooda boolisnimo.

Haddii aad dareento in si xun ay kuula dhaqmayaan booliska waqti ay baarayaan aqoonsi, weydii magaca sarkaalka boolis qor na taariikhda, waqtiga iyo meesha.

Wargali dhacdada xafiiska cabashooyinka ee taliska booliska Magaalada Bern. beschwerdestelle@police.be.ch ama saldhigga boolis ee kuugu dhow.

Si dalal kale, dabeecado gaar ah ayaa sidoo kale ka mamnuucan Switzerland waxay na mudan yihiin ciqaab, tusaale ahaan:

- > Faraxumeyn galmo iyadoo la adeegsanayo hadal, meedaar ama falal ciqaab ayay mudan yihiin, wiilal, gabdho iyo rag. Difaac naftaada haddii lagu dhibo raadina caawin.
- > Bulshadeena uma dulqaadato nooc walba oo shaqaaqa ah- xitaa guriga qoyska gudihiisa. Qof walba ayaa wargalin kara booliska- haddii xataa aad aragto ama aad maqasho shaqaaqa guriga dariska ah!
- > Haddii wax la xado ama la waxyeelleeyo hanti middan soo socota ayay hoos imaanayaan: waxa aad leedahay adiga ayaa leh mar walba.

Haddii aad dhibane ama eege dembi tahay, booliska wac (Tel: 112 ama 117 lacag la'aan). Waan shaqaynaa sannadka dhan, maalin iyo habeenbo.

